

Xaggee Hadda la aadayaa? Buug-Tilmaame u ah VCE-da iyo VCAL-ka

**Macluumaadka loogu talagalay Ardayda
Ingiriisigu Luqadda Labaad u yahay iyo
waalidiintooda**

WAX KU SAABSAN VCE –DA (ABOUT THE VCE)

Maxay tahay VCE? (What is the VCE?)

Shahaadada Waxbarashada ee Victoria (Victorian Certificate of Education - VCE) waa shahaado aqoonsan dhammaystirka buuxa ee waxbarashadaadii dugsiya sare. Waa shahaado heer sare ah oo laga aqoonsan yahay adduunka oo dhan. VCE waxay keenaysaa waddooyinka loo maro daraasad dheeraad ah oo lagu qaato jaamacadda, iyo Waxbarashada TAFE-ka iyo waddooyinka loo maro adduunka shaqada. Waxaa kale oo suurtagal ah in shaqo-barasho ama tababar dugsiya-ku-xiran lala qaato VCE-da.

Goormaan bilaabi karaa VCE-dayda? (When can I start my VCE?)

VCE-da waxaa loogu talagalay in lagu qaato Sannadaha 11aad iyo 12aad hase ahaatee waxaa lagu sii bilaabi karaa Sannadka 10aad. Ugu yaraan kala-badh ardayda Sannadka 10aad ee Victoria ayaa qaata cutubyada VCE-da.

Muxuu yahay barnaamijka VCE-da? (What is a VCE program?)

Barnaamijka VCE-du waa cutub dhan oo daraasado ah oo aad qaadan doonto si aad u dhammaystirto VCE-daada. Waxaad kala dooran kartaa daraasadaha VCE-da oo noocyo badan.

Maxaan kala dooran karaa? (What do I have to choose from?)

VCE-da waxaa ku jira 90 daraasadood, ama maaddo, oo la kala dooranayo. Kuwaas waxaa ka mid ah, 30 barnaamijyada Waxbarashada Mihniga ee VCE-da iyo Tababarka ah (VCE Vocational Education and Training - VET) kuwaas oo bixiya shahaadooyinka xirfadda oo qaran ahaan loo aqoonsan yahay. Waxaa kaloo jira doorashooyin kale, tusaale ahaan Maaddada Taariikhda waxaad ku baran kartaa Kacaannadii, saxwadii Talyaaniga ama Taariikhda Australia. Waxaad kaloo kala dooran kartaa dhowr daraasadaha Xisaabta ah ama Koox ama keliyeed daraasadda Matalaadda Muusikada. Waxaa kaloo jira 46 daraasadaha Luqadaha Aan Ingiriisiga Ahayn (LOTE) oo la qaadan karo.

Daraasadda VCE-da waxaa guud ahaan loogu talagalay inay ku dhammaato hal sano, waxayna u kala qaybsan tahay cutubyo. Cutubka wuxuu socdaa ilaa kala badhka sannadka ama waa hal samistar. Cutubyada 1aad iyo 2aad waxaa loo qaadan karaa ayagoo ah cutub keliya ah – taas oo macnaheedu yahay in la qaadan karo mid keliya oo Cutubka 1aad ama Cutubka 2aad ah– hase ahaatee Cutubyada 3aad iyo kuwa 4aad waa in loo qaataa sidii ayagoo ah isku-xig (sequene) laba cutub ah. Haddii aad isku qorto Cutubka 3aad daraasad ah, waxaa kaloo lagaa filayaa inaad isku qorto Cutubka 4aad ee daraasaddaas, badanaa isla sannadkaas.

Barnaamijka VCE-da wuxuu badanaa ka koobmaa 20 ilaa 24 cutub oo lagu qaato laba sano, in kastoo aad kala duwi karto tirada cutubyada aad samaynayso halkii sano.

Cutubyada 3aad iyo 4aad waxaa sida caadiga ah lagu qaataa sannadka ugu dambeeya dugsiya. Haddii aad qorshaynayso inaad ku qaadato Cutubyada 3aad iyo 4aad Sannadka 11aad, ogsoonow inay ka dhib badan yihiin Cutubyadii 1aad iyo 2aad.

Markaad samaynayso doorashadaada waa inaad ka fiisataa daraasadaha:

- aad jeceshahay
- aad ku wanaagsan tahay
- kuu sahlaya shaqada aad jeceshahay
- kuu diyaarin kara tababar dheeraad ah ama koorsooyinka jaamacadeed oo aad doonayso
- ku siin kara aqoonsiga VET-ka, kaas oo ah barnaamijka VCE VET oo bixiya shahaadada VET-ka oo ka mid ah VCE-daada.

Maxaan ka dooran karaa dugsigayga? (What can I choose from at my school?)

Dugsi kasta asagaa ayaa go'aamiya daraasadaha VCE-da iyo kuwa barnaamijka VCE VET-ka uu bixinayo iyo jadwalka uu ku bixinayo.

Waxaad kaloo yeeli kartaa inaad daraasad ka qaadato meel ka baxsan dugsigaaga (tusaale, dugsiga Victorian School of Languages), haddii uusan dugsigaagu awoodi karin inuu bixiyo daraasadaas gaarka ah taas oo aad jeceshahay inaad qaadato.

Keliya maahan inaad hubiso daraasadaha VCE-da ee dugsigaagu bixiyo, hase ahaatee waxaa kale oo aad hubisaa in daraasadaha aad dooratay ku habaysan yihiin jadwalka dugsigaaga.

Xaq ma u leeyahay Waxbarashada Aqoon-Dirsadka? (Am I eligible for Distance Education?)

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan Waxbarashada Aqoon-Dirsadka (xaq-u-yeelashada maaddooyinka la bixiyo, isku qoridda, iwm) waxaad eegtaa www.distance.vic.edu.au

Maxay tahay inaan ku daro barnaamijkayga VCE-da?

(What must I include in my VCE program?)

Dugsigaaga ayaa ku siinaya talada si loo hubiyo inaad qaadanayso tiradii saxda ahayd ee cutubyada iyo isugayntii saxda ahayd ee cutubyada si aad uga qalin-jebiso VCE-da. Waxaa lagu siin doonaa fursad si aad u ogolaato ku-qornaantaada aadna u habsato sannadka horraantiisa xaq-u-yeelashadaada oo ku qoran foomka Faahfaahinta Shakhsiga.

Si aad u hesho VCE-daadii, waa inaad si buuxda u dhammaysaa ugu yaraan 16 cutub.

Ayadoon loo eegayn intay tahay tirada isugaynta cutubyada aad samaynayso, waa inaad si buuxda u dhammaysaa:

- Ugu yaraan saddex cutub oo ka mid ah Kooxda Ingiriisiga (English Group) ee hoos ku qoran:
 - Foundation English Units 1 and 2 (Cutubyada 1aad iyo 2aad)
 - English/English as a Second Language (ESL) Units 1 – 4 (Cutubyada 1aad – 4aad)
 - English Language Units 1 – 4 (Cutubyada 1aad – 4aad)
 - Literature Units 1 – 4 (Cutubyada 1aad – 4aad)

Wax ka badan laba cutub ee Cutubyada 1aad iyo 2aad laguma tirinayo shuruudaha Ingiriisiga ee layska doonayo. Si aad u hesho ENTER waa inaad dhammaysaa labada Cutubba 3aad iyo 4aad ee Ingiriisiga oo isku-xiga.

- Saddex daraasadaha Cutubyada 3aad iyo 4aad oo isku-xiga oo lagu daray isku-xigga laga doortay kooxda Ingiriisiga. Isku-xiggaan wuxuu noqon karaa daraasadaha VCE-da ama barnaamijyada VET-ka. Waxaad u baahan tahay inaad la socoto in VTAC ay xannibaad saartay isugaynta qaarkeed ee daraasadaha VCE-da iyo VET-ka. Haddii aad doonayso inaad codsato Isu-dhigga Qaran Dhibcaha Gelitaanka Jaamacadda (Equivalent National Tertiary Entrance Rank - ENTER) markaad dhammayso VCE-daada, waxaad u baahan doontaa inaad la socoto xannibaadahaas. Kala hadal Isu-duwaha VCE-daada (VCE Coordinator).

WAX KU SAABSAN VET (ABOUT VET)

Waxaa jira saddex siyaabood oo VET-ka looga dhigi karo qayb ka mid ah VCE-daada waxaana looga hadlayaa hoos:

1. Muxuu yahay Barnaamijka VCE VET? (What is a VCE VET program?)

Waxaad dooran kartaa barnaamijka VCE VET oo qayb ka noqon kara VCE-daada. Barnaamijka VCE VET wuxuu ku siinayaa shahaado mihni ah oo leh kareedhitkii VCE-da sida daraasadaha VCE-da oo kale. Barnaamijyada VCE VET waxay ku siinayaan kareedhit aad ku hesho Cutubyada 1aad – 4aad. Taas macnaheedu wuxuu yahay inaad qaadnayso tababarka maaddooyinka mihniga ah, tusaale hospitality, agriculture, information technology ama engineering.

Ayadoo qayb ka ah tababarkaaga waxaad qaadnayso waxbarasho goob-shaqo oo qorshaysan taas oo ku siinaysa fursad aad aqoontaada iyo xirfadahaaga ku hirgeliso.

Tababarkan wuxuu kuu keenayaa dhammaystirka buuxa ee VCE-daada wuxuuna ku siinayaa shahaado mihnadeed qaran ahaan loo aqoonsan yahay. Shahaadada mihnadeed waxay ku siinaysaa helitaanka tababar dheeraad ah, tusaale Machadka TAFE-ka, waxayna kor-u-qaadi kartaa fursadahaaga aad shaqo ku heli karto markii aad dugsiga dhammayso.

Tiro barnaamijyo ah ayaa waxay kaloo leeyihiin dhibco daraasadeed la heli karo ayadoo kuwaan iyo badiba barnaamijyada VCE VET ay wax ku biirshaan ENTER-ka. Hadda waxaa jira in ka badan 30 barnaamijyada VCE VET ah oo la kala dooran karo.

Bugga-yar oo loogu talagalay mid kasta oo barnaamijyada VCE VET ah waxaa laga heli karaa website-ka VCAA oo ah www.vcaa.vic.edu.au

Dugsigaaga wuxuu kaloo hayaa koobiyo (nuqullo) ku saabsan buugagga yaryar ee barnaamijyadaas.

Waxaad ka habsan kartaa Isuduwaha VCE-da ama VET ee dugsigaaga si aad u ogaato sida barnaamijka VCE VET ee kasta uu wax ugu biirsho VCE-daada.

2. Maxay tahay Shaqo-barashada Cusub ee Dugsiga-ku-xiran ama Tababarku?

(What is a School Based New Apprenticeship or Traineeship?)

Si kale oo tababarka mihniga ah uu wax ugu biirsho VCE-daada waa Shaqo-barashada Cusub ee Dugsiga-ku-xiran ama Tababarka (School Based New Apprenticeship - SBNA or Traineeship). Si aad u noqoto shaqo-barte ama tababar-qaate waa inaad ka shaqaysaa shaqo mushaar laga qaato aadna saxiixdaa heshiis tababar kaas oo ay tahay in laga diiwaan-geliyo Xafiiska Office of Training and Tertiary Education (OTTE).

Barnaamijkaaga VCE-da wuxuu isla waqti yahay shaqadaada dhimman iyo tababarkaaga mihnadeed. Sidaas darteed VCE-daada waxay ka kooban tahay saddex qaybood:

- daraasadaha VCE-da oo dugsiga lagu qaato
- tababarka mihnadeed, oo lagu qaato machadka TAFE-ka tusaale
- shaqo dhimman, oo ah shaqo mushaari ah oo tababarka ku qaadnayso.

Hadda waxaa jira kow-iyo-toban xirfadood halkaas oo VCAA ka dhistay nidaamyada kareedhitka VCE-da waxaadna qaadat kartaa shaqo-barasho ama tababar oo qayb ka ah VCE-daada.

Shahaadada Shaqo-barashada Dugsiga-ku-xiran (SBNA) oo aad qaadato waxay wax ku biirinaysaa dhammaystirka buuxa ee VCE-da sida barnaamijyada VCE VET ay wax ugu biirshaan; taasna waxay tahay, inay ku siinaysa inaad kareedhit ku hesho Cutubyada 1aad – 4aad.

Barnaamijyada SBNA waxay wax ku biirshaan ENTER sidii ay barnaamijyada VCE VET wax ugu biirsheen oo kale. Waxaad u baahan doontaa inaad ka hubiso dugsigaaga si aad u ogaato sida SBNA laguugu habayn karo. VCE VET iyo barnaamijyada SBNA waxay kaloo qayb ka noqon karaan barnaamijka waxbarashada VCAL ee ardayga. VCAL dib ayaan buugga ugu sharxi doonaa.

3. Aqoonsiga Kareedhitka Qaybta VCE-da ah (Block Credit Recognition in the VCE)

Haddii aad doonayso inaad samayso shahaadada tababarka mihnadeed taas oo aan laga helin barnaamijyada VCE VET ama kow-iyo-tobanka SBNA ee kor lagu sheegay, waxaad yeeli kartaa inaad tababarka ku darsato dhammaystirka buuxa ee VCE-da.

Nidaamkan kareedhitka ah waxaa loo yaqaan 'Kareedhitka Qaybta' (Block Credit). Waxaa jira sharciyada qaarkood oo ku saabsan sida kareedhitka loogu bixiyo VCE-da ayadoo nidaamkan la marayo. Waa inaad kala hadashaa Isuduwaha VET-kaaga ama VCE-daada wixii macluumaad dheeraad ah.

SIDEE BAAN UGA QALIN-JEBIN KARAA VCE-DA (HOW DO I GRADUATE WITH THE VCE?)

Qaybtan labaad waxay sharxaysaa sidaad uga shaqayn lahayd inaad ka qalin-jebiso VCE-da. Waxay kaloo sharxaysaa qiimaynta aad samayn doonto, sida natiijooyinka qiimayntaada laguugu soo sheegi karo iyo adeegyada ballaaran oo natiijooyinkaas ku siin karaan.

Maxay tahay inaan sameeyo si aan u-qalin-jebiyo? (What do I have to do to graduate?)

Ka -qalin-jebinta VCE-da waxay macnaheedu tahay in guushaada aad u qaadato sidii ayadoo qaab Shahaado ah laga aqoonsan yahay Australia iyo caalamka oo dhan. Qalin-jebintu waxay u baahan tahay:

- inaad dhammaystirtay shuruudihii Barnaamijka VCE-da.
- In shaqadaadii la qiimeeyey, ayna noqotay heer dhammaystiran.

Sidee baan ku ogaanayaa heerka? (How will I know the standard?)

Isla markii aad doorato barnaamij kaas oo kuu ogolaanaya inaad yeelato shuruudihii qalin-jebinta, waxaad u baahan tahay inaad qabato shaqo buuxda oo kuu ogolaan karta inaad qalin-jebiso. Ka-qalin-jebinta VCE-du waxay ku xiran tahay dhammaystirka buuxa ee cutubyada ay ka samaysan yihiin daraasadahaagu. Dhammaystirka buuxa waxaa lagu muujiyaa siinta 'S'. Haddii aadan ka soo bixin shuruudihii dhammaystirka buuxana waxaa lagu muujiyaa 'N'.

Go'aanka ku saabsan dhammaystirka buuxa, oo ah inaad dhammaysay Cutubyadii 1aad iyo 2aad, ama Cutubyadii 3aad iyo 4aad waxaa sameeya dugsigaaga.

Go'aanka ku saabsan dhammaystirka buuxa, waxay ku salaysan yihiin waxqabadka aad ka samnayso mid kasta oo ka mid ah natiijooyinka lagu sheegay qorshaha daraasadda (study design) ee daraasad kasta leedahay. Natiijadu waxay sheegaysaa waxaa lagaa filayo inaad taqaan ama aad qaban karto (aqoonta iyo xirfadaha muhiimka ah) isla markii aad dhammayso hal cutub. Cutubkii kasta oo daraasadda VCE-da ka mid ah wuxuu leeyahay inta u dhaxaysa labo ama afar natiijo.

Daraasadaha oo dhan, dugsigaagu wuxuu go'aamiyaa bal inaad si buuxda u dhammaysatay cutubka. Haddaba si loo sameeyo go'aankan, dugsigaagu wuxuu samaynayaa shaqooyinka qiimaynta oo lagu eegayo sidaad horumarka u samaynayso. Shaqooyinkan waxaa kuu samaynaya barahaaga oo ka qaadanaya liiska ku yaal qorshaha daraasadda (study design) waxaana lagu saxayaa dugsiga dhexdiisa.

Barahaaga ayaa ku siinaya liiska shaqooyinka iyo waqtiga kama dambaysta ah oo lagu soo gudbinayo. Haddii waqtigaas kama dambaysta ah la dhaafo waa inaad haysataa sabab macquul ah oo waqtiga lagugu badiyo, sidaas darteed haddii aad haysato wax ka badan hal waqti kama dambays ah muddaduna gaaban tahay waxaad u baahan doontaa inaad qorshaysato shaqadaada sidaad ugu dhammayn lahayd waqtiga kama dambaysta ah. Haddii aad ka soo bixi weydo waqtiga kama dambaysta ah ee dugsigaaga waxay noqon kartaa inaad helin dhammaystirka buuxa ee cutubkaas.

Cutubyada 1aad iyo 2aad, dugsiyadu guud ahaan waxay xoogga saaraan ‘S’ ama ‘N’ (inkastoo dugsiyada qaarkood ay natiijooyinka ku soo gudbiyaan sidaad wax uga qabatay qiimayntii shaqooyinka ayagoo dhibco kugu siinaya shaqadaada).

Sidee baa la iigu qiimaynayaa Cutubyada 3aad iyo 4aad?

(How will I be assessed in Units 3 and 4?)

Cutubyada 3aad iyo 4aad waxaad helaysaa dhibco ama ‘S’ ama ‘N’ sida kor lagu sheegay. Heerka Cutubyada 3aad iyo 4aad, VCAA ayaa muraaqabaynaysa qiimaynta ardayda oo dhan.

Qiimaynta dhibcaha waxay noqon kartaa qiimayn dugsiga ku-xiran ama imtxaan. Daraasadda VCE-da oo kasta waxay leedahay saddex qiimayn oo dhibcaysan oo lagu sameeyo isku-xigga Cutubyada 3aad iyo 4aad, oo kala ah laba qiimayn oo dugsiga ah iyo hal imtxaan ama hal qiimayn oo dugsiga ah iyo laba imtxaan. Habkaas qiimaynta oo kale ayaa lagu sameeyaa barnaamijyada VCE VET oo la soo xushay lana dhibceeyey kuwaas oo ayaguna leh qiimaynta dugsiga iyo imtxaan. Daraasadda VCE-da ee kasta waxay leedahay ugu yaraan hal qiimayn.

VCE-da, waxaa jira laba nooc oo qiimayn dugsi ah.

Tan koowaad waxaa loo yaqaan Shaqada-Koorsada oo Dugsiga-lagu-Qiimeeyo (School-assessed Coursework). Tani waxay qiimaynaysaa sidaad wax uga qabatay shaqooyinkii qiimaynta. Shaqooyinkan waxaa badanaa la sameeyaa waqtiga fasalka lagu jiro. Daraasadaha oo dhan, marka laga reebo Studio Arts, waxay wataan Shaqada-Koorsada oo Dugsiga-lagu-Qiimeeyo.

Nooca labaad ee qiimaynta dugsiga waa Shaqada Dugsiga lagu Qiimeeyo (School-assessed Task). Toddoba daraasadood oo keliya ayaa leh Shaqada Dugsiga lagu Qiimeeyo. Kuwaas oo ah Art, Design and Technology, Food and Technology, Media, Studio Arts, Systems Engineering, iyo Visual Communication and Design. Shuruudaha laga doonayo Shaqada-Koorsada oo Dugsiga-lagu-Qiimeeyo waa isku mid dugsi kasta waxaana sameeya VCAA. Dugsigaaga ayaa kuu qorshaynaya nashaadyada shuruudaha si ay kuugu caawiyaan dhammaystirka Shaqada-Koorsada Dugsiga-lagu-Qiimeeyo. VCAA waxay go’amisaa buundooyinka iyo dhibcaha la siinayo. Barahaaga ayaa sameeya sixidda dugsigaaguna wuxuu VCAA u dirayaa dhibcaha oo muujinaya sida wanaagsan oo wax uga qabatay Shaqada-Koorsada Dugsiga-lagu-Qiimeeyo.

Imtixaannada Dibadda (External examinations)

Imtixaannada Dibadda (qoraal, hadal, waxqabad ama electarooniga ah), waxaa sameeya oo saxa VCAA. Badiba waxaa la qaadaa Nofeembar, hase ahaatee tiro yar oo daraasado ah ayaa la qaadaa imtixaankooda Juun ama Oktoobar.

Maxay yihiin hubinaha qiimaynta VCE-da ? (What are the checks on VCE assessment?)

Dhammaan noocyada qiimaynta oo dhan, ha ahaadeen qiimaynta dugsiga ama imtxaane, VCAA waxay leedahay habraac fiican oo lagu hubiyo in dugsiyada dowlad-goboleedka oo dhan ay wax ku saxayaan hal heer oo isku mid ah. Waxaa ka mid ah habraacyada tirokoobka, hubino dhowr ah oo lagu sameeyo dhan kasta ee qiimayntaada ah. Waxaad faahfaahinta ka helaysaa dugsigaaga ama website-ka VCAA.

MUXUU YAHAY GAT? (What is the GAT?)

Imtixaanka Waxqabadka Guud (General Achievement Test - GAT) waa imtixaan ku saabsan aqoonta guud iyo xirfadaha oo ku saabsan wada-hadalka, xisaabta, sayniska, iyo taknoolojiyadda, Insaaniyadda, farshaxanka iyo sayniska bulshada.

GAT wuxuu qayb muhiim ah ka yahay hababka qiimaynta VCE-da. In kastoo aysan qayb ka ahayn shuruudaha qalin-jebinta aysanna ku tirsanayn natiijooyinka VCE-da ama ENTER, haddana GAT waxay qayb muhiim ah ka qaadataa hubinta qiimaynihii iyo imtixaannadii dugsigaaga in si sax ah loo qiimeeyey.

Sidaas darteed, haddii aad ku qoran tahay Cutubyada 3aad iyo 4aad oo daraasadda VCE-da ah ama barnaamijka VCE VET ah – Sannadkii 11aad ama Sannadkii 12aad – waa inaad u fariisataa GAT inay VCAA kaa dayso maahee. Taas oo ah inay jirto sabab macquul ah ee arrintan.

Natiijooyinka GAT waxaa lagu soo qori doonaa Caddaynta Natiijooyinkaaga.

SIDEE BAA NATIJOOYINKAYGA LA IIGU SOO SHEEGI DOONAA?

(HOW ARE MY RESULTS REPORTED TO ME?)

Caddaynta Natiijooyinka (Statement of Results)

Haddii aad qaadatao Cutubyada 1aad iyo 2aad oo keliya, waxaad ka helaysaa Caddaynta Natiijooyinka dugsigaaga. Haddii aad qaadanayso Cutubyada 3aad ama 4aad, Caddaynta Natiijooyinka waxaa boostada kuu soo dhigaya VCAA bisha Diseembar.

Caddaymaha Natiijooyinka waxay muujin doonaan bal inaad ka heshay ama aadan ka helin ‘S’ ama ‘N’ cutub kasta oo aad ku qoran tahay – ee Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad.

Qiimayntaada ah Shaqada-Koorsada oo Dugsiga-lagu-Qiimeeyo, Shaqada dugsiga lagu qiimeeyo iyo imtixaannada waxaa lagugu soo warbixinayaa sidii ayadoo ah dhibcaha A+ ilaa E ama UG (aan dhibco la siin).

Haddii aad hesho laba qiimaynood oo dhibcaysan ama ka badanba aadna ku heshay S’ Cutubka 3aad iyo Cutubka 4 ee daraasadda ku jira, waxaad helaysaa dhibcaha daraasadda. dhibcaha daraasadda waxaa lagu xisaabiyaa qiyaasta 0–50 waxayna cabbiraad u tahay

Sida wanaagsan oo aad wax uga qabatay marka loo eego waxyaalaha kale oo qayb ka ahaa daraasadda.

Dhibcaha daraasadda oo ay xisaabisay VCAA waxaa adeegsan doonaa Victorian Tertiary Admissions Centre (VTAC) si ay u xisaabiso ENTER-kaaga (hoos ka eeg ‘Waxyaalaha kale oo ay tahay inaan ogaado’).

Haddii aad dhammaystirtay Cutubyada VCE VET waxaa lagu muujin doonaa Caddaymaha Natiijooyinka, haddii aad markaas dhammaystirtay barnaamijka VCE VET oo buuxa waxaad shahaado gaar ah ka helaysaa Registered Training Organisation (RTO) oo la socota VCE-daada. Haddii aad qaadatay qiimaynta daraasad dhibcaysan ee barnaamijka VCE VET ah dhibcahaaga waxaa lagu qori doonaa Caddaynta Natiijooyinka ayadoo la socota daraasadaha VCE-da.

Shahaadada VCE-da (VCE certificate)

Waxaad kaloo helaysaa shahaado haddii aad buuxisey shuruudihii qalin-jebinta ee VCE-da.

WAXYAALAHA KALE OO AY TAHAY INAAN OGAADO

(OTHER THINGS I MIGHT LIKE TO KNOW)

Daraasadda la kordhiyey? (Extension Studies)

Daraasadaha la kordhiyey waa maaddooyinka jaamacadda oo lagu qaatay VCE-da. Haddii aad tahay high achiever oo aad doonayso taxaddi dheeraad ah, waxay yihiin daraasadahan sidii lagu kordhin lahaa doonistaada maaddada oo ka hormarsan VCE-da. Maaddooyinkan maahan cutubyo VCE-da ah lagumana tirinayo inay qayb ka yihiin 16ka cutub ee looga baahan yahay dhammaystirka buuxa.

Yaa samayn kara daraasadda la kordhiyey? (Who can do extension studies?)

Daraasadaha la kordhiyey waxaa loogu talagalay ardayda waxqabadka sare samaysay kuwaas oo muujiyey natiijooyin heer sare ah. Ilaa boqolkiiba 2 ardayda oo VCE-da ayaa sannad kasta xaq u yeesha. Ardaydu si toos ah ayey codsi ugu qortaan jaamacadda bixisa daraasadda ay doonayaan. Ardaydu waa inay la tashadaan dugsiyadooda ka hor intaysan bilaabin daraasadda la kordhiyey. Dugsigaaga ayaa haya tilmaan-raacyada ay jaamacaduhu sameeyeen kuwaas oo caawinaya in la habsado in ardayda la xushay ay awood u leeyihiin inay qaataan VCE-dooda iyo barnaamijka daraasadaha la kordhiyey. Barnaamijka daraasadaha la kordhiyey oo dhan ugu yaraan waa boqolkiiba 20 waqtiga-buuxa ee barnaamijka Sannadka-kowaad ee jaamacadda.

Xulashada waxaa sal u ah waxqabadkaaga daraasadaha diyaargarowga ee VCE-da ee barnaamijka daraasadaha la kordhiyey oo aad doonayso inaad samayso. Daraasadda diyaargarowga waxay ku siinaysaa asaaskii lagama maarmaanka u ahaa maaddada jaamacadda ee ka mid ah barnaamijkaaga daraasadaha la kordhiyey. Sida caadiga ah waxaad u baahan tahay inaad dhammaysay isku-xiggii Cutubyadii 3aad iyo 4aad ee daraasadda diyaargarowga taas oo ku siinaysa asaaskii lagama maarmaanka u ahaa maaddada jaamacadda. Qaar ka mid ah daraasadaha diyaargarowga waxaa lala samayn karaa isla waqti daraasadaha la kordhiyey. Waa inaad arrintan kala tashataa dugsigaaga iyo jaamacadda. Dugsigaagu wuxuu kaloo u baahan yahay inuu ku qanacsan yahay inaad gaartey ama aad gaari doonto dhibcihii daraasadda VCE-da oo ugu yaraan ah 41 daraasadda diyaargarowga (wixii macluumaad ah oo ku saabsan dhibcaha daraasadda ka eeg ‘sidee baa natiijooyinkayga la iigu soo sheegi doonaa?’)

Maxay yihiin faai’dooyinku? (What are the benefits?)

Haddii aad si buuxda u dhammayso daraasadda la kordhiyey natiijooyinka waxaa lagu qori doonaa Caddaynta Natiijooyinka waxayna ku darmaysaa ENTER-kaaga sidii ayadoo ah daraasadda VCE-da ee lixaad. Waxay ku siin kartaa 4.0, 5.0 ama 5.5 dhibcood ee isugaynta xisaabinta ENTER-kaaga, ayadoo ku xiran natiijooyinkaaga daraasadda la kordhiyey. Haddii aad ku gudubto barnaamijka daraasadaha la kordhiyey waxaad sida caadiga ah yeeli kartaa inaad jaamacadda ku qaadato maaddadaadii oo heerka sannadka-labaad ah haddii lagu xusho koorsada ay maaddadaasi ka mid tahay.

Waa inaad ogaataa in isku qoridda daraasadda la kordhiyey inay macnaheeddu tahay inay ku fuulayo culays weyn iyo sidoo kale shaqo adag, hase ahaatee abaalmarintuna waa mid ayaduna aad u weyn.

Haddii aad u malaynayso in barnaamijkan uu kuu wanaagsan yahay, fadlan marka hore la xirriir jaamacadaha si aad u ogaato faahfaahinta dheeraadka ah ee daraasadaha la kordhiyey oo ay bixiyaan. Maaddooyinka ay bixiso jaamacad kastaa iyo qaabka loo helo wuu is-baddali karaa sannadba sannadka kale taasna waa muhiim inaad tixgeliso haddii iyo markii aad go’aansato inaad isku qorto barnaamijka Daraasadaha La-Kordhiyey.

Sidee baan ku heli karaa jaamacad ama TAFE? (How can I get into university or TAFE?)

VCAA waxay xisaabisaa dhibcihii daraasadda ee laga helay saddexda qiimaynaha la saxay ee daraasad kasta. Dhibcaha ugu sarraysa ee daraasad kastaa waa 50.

Adeegsiga dhibcaha daraasadaha ee Cutubyada 3aad iyo 4aad, oo ay xisaabisay VCAA, ayaa VTAC ka samaysaa ENTER-kaaga. Daraasadaha kale oo loo adeegsadey xisaabinta ENTER-kaaga waxaa ku jiri kara barnaamijyada VCE VET iyo daraasadaha la kordhiyey. ENTER-ka ayaa loo adeegsadaa barta asaasiga ah ee xulashada ugu yaraan boqolkiiba 50 koorsooyinka. Hay'adaha xulashada koorada ee haray waxay adeegsadaan kariteerooyin badan oo ay ku jiri karaan ENTER iyo bandhigga diiwaanka, dhagaysiyo, waraysiyo iwm. ENTER-ka waxaa loo sameeyaa ayadoo lays barbardhigayo daraasadaha ardayda oo dhan waxaana ka mid ah adeegsiga tirokoobka dhibcaha daraasadda, iyo u-baddaliddooda dhibcaha maaddada ENTER-ka. Taas macnaheedu wuxuu yahay in daraasadaha oo dhan si siman loo wajaho ayadoo loo ogolaanayo in si wadajir ah laysugu daro si isugaynta-weyn looga sameeyo, ka dibna loo baddalo ENTER. Faahfaahinta dheeraadka ah oo ku saabsan habkan iyo xulashada jaamacadda waxaa lagu soo qoraa daabacadaha faafinta VTAC ee soo socda:

Enter into Tertiary Study (Website-ka VTAC oo keliya)

ABC of Scaling (koobiga ama nuqulka waxaa bisha Diseembar lala soo diraa asagoo la socda caddaynta ENTER)

Choice! (Buug-yar oo Sannadka 10aad ah ayaa laga helaa dugsiyada)

VTAC Guide 2007 (oo laga heli karo newsagents)

Victorian Tertiary Entrance Requirements (VICTER) 2008 or 2009 (Buug-yar oo Sannadka 10aad ah ayaa laga helaa dugsiyada)

Website-ka VTAC: www.vtac.edu.au

Aqoonsiga waxqabadyada VCE-da (Recognising achievement in the VCE)

Waxaa jira siyaabo badan oo ardayda VCE-du ay ku muujin karaan dadaalkooda iyo aqoontooda sare. Ka-qaybgalka ardayda ee dugsigooda iyo bulshadooda waxaa lagu aqoonsadaa Abaalmarinta VCE Achievers Award. Sarraynta shaqada ay samaeeyaan sannad kasta waxaa lagu aqoonsadaa Season of Excellence kaas oo ay ku jiraan Top Designs, Top Class, Top Screen, Top Acts iyo Top Arts. Waxaa kaloo jirta Premier's Awards, VCAA Plain English Speaking Award iyo Jaai'sada Australian Students Prize.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee abaalmarinadan ka eeg website-yada VCAA oo ah:

www.vcaa.vic.edu.au/excellenceawards/seasonofexcellence/index.html

www.vcaa.vic.edu.au/excellenceawards/vceachiever.html

www.vcaa.vic.edu.au/excellenceawards/australianstudentprize.html

www.vcaa.vic.edu.au/excellenceawards/premiersaward.html

www.vcaa.vic.edu.au/excellenceawards/plainenglishspeaking/index.html

WAX KU SAABSAN VCAL (ABOUT THE VCAL)

Wixii macluumaad ah oo VCAL ka eeg website-ka VCAA waxaadna riixdaa

www.vcaa.vic.edu.au/vce/publications/WhereToNow/vcallote.html